



MINNESOTA KREDITKA CANSHUURTA CARUURTA

LACAG BIXINTA HORUDHACA AH

Waxaad dooran kartaa inaad hesho qayb ka mid ah Kreditka Canshuurta Carruurta ee sannadka soo socda iyada oo loo sii maro saddex lacag-bixin horudhac ah ka hor intaadan gudbin canshuurahaaga dakhliga ee xiga.

Ma u qalmaa lacag-bixinta horudhaca ah?

Waxaad dooran kartaa inaad hesho lacag-bixinta horudhaca ah haddii dhammaan shuruudahan ay run yihiin:

- Waxaad u qalantaan Gunooinka Canshuurta Carruurta sanad-canshuureedka 2024.
- Waxaad gudbisaa warbixintaada canshuurta dakhliga Minnesota ugu dambeyn Abril 15.
- Waxaad haysataa carruur u qalma oo ka yar 17 jir dhamaadka sanadka 2024.

Sideen u doortaa in aan helo lacag-bixinta horudhaca ah?

Markaad dalbaneysa gunada, waa inaad saxdaa sanduuqa ku yaal Schedule M1CWFC, oo ah Gunooinka Carruurta iyo Qoysaska Shaqeeya ee Minnesota.

Goorma ayaan heli doonaa lacag-bixintayda?

Haddii aad u qalanto oo aad doorato in laguu diro lacag-bixinta horudhaca ah, waxaad heli doontaa saddex qaybood oo isku mid ah. Waaxda Dakhliga Minnesota waxay bilaabi doontaa dirista lacagaha dhammaadka Luulyo, Sebtembar, iyo Nofeembar. Iyadoo ku xiran nooca lacag-bixinta, waxaad filan kartaa inaad hesho lacagaha taariikh la cayimay.

- **Xisaab-Dhigista Tooska ah:** Agoosto 1, Oktoobar 1, Diseembar 1
- **Jeeg:** Agoosto 15, Oktoobar 15, Diseembar 15

Ma jiraan xaalado aan ku qasbanaan karo in aan dib u celiyo lacag-bixinta horudhaca ah?

Xaalado qaarkood, lacag-bixinta horudhaca ah waa in dib loo celiyo. Lacagta laguu soo celinayo ee warbixintaada canshuurta xigta ama baaqiga aad bixinayso ayaa saameyn ku yeelan kara.

Si loo yareeyo walaaca la xiriira dib u bixinta qayb ama dhammaan lacagaha horudhaca ah ee la helay, waxaan abuurnay gunno ugu yaraan ah oo bilaabaneysa sanad-canshuureedka 2025. Booqo websayt-keena si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah?

Booqo www.revenue.state.mn.us oo geli **advance payments** sanduuqa raadinta

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa adeegyada diyaarinta canshuurta bilaashka ah! Booqo www.revenue.state.mn.us oo geli **free tax preparation** sanduuqa raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta ee bilaashka ah ee kuugu dhow.